


Si taxadar leh u akhri hagahan oo dhan ka hor inta aanad bilaabin baaritaanka. Baaritaankaan waxaa laga yaabaa inuu ka duwan yahay kuwii aad horey u isticmaashay.

Hagahaaga tillaabo-ka-tillaabo ee SureScreen SARS-CoV-2 Cajalada Baaritaanka Deg degga ah ee Difaaca Jirka (Suufka sanko) (Dahab)



Tilmaamahan waxaa loogu talagalay SureScreen Diagnostics SARS-CoV-2 Cajalka Baaritaanka Deg Degga ah ee Difaaca Jirka (Suufka sanko) (Dahab), Koodhka alaabta: COVID19AGVCGS7.

Hagaha waxa uu sharxayaa sida loo tijaabiyo naftaada, ilmahaaga ama qof kale COVID-19, iyo sida loo soo sheego natiijadaada.

Noocyada luuqadaha kale iyo bandhigyada muuqaalka ayaa laga heli karaa: [gov.uk/covid19-self-test-help](https://www.gov.uk/covid19-self-test-help)

Waxa aad u baahan

Hagahaaga tallaabo-ka-tallaabo

Akhri tilmaamaha oo u raac tillaabooyinka sida saxda ah. Baaritaan kastaa wuxuu qaataa ilaa 15 daqiiqo in la dejiyo iyo natiijadu waxay diyaar noqon doontaa 10 daqiiqo.



1	Diyaarso aagga tijaabada oo hubi waxa ku jira xirmada baaritaanka	bogga 6
2	Sameyso baaritaankaaga	bogga 8
3	Qaado muunadda suufkaaga	bogga 10
4	Habey muunada suufka	bogga 12
5	Akhri natiijadaada	bogga 14
6	Ka warbixi natiijadaada	bogga 15
7	Waxa ay ka dhigan tahay natiijadaadu	bogga 16
8	Waxqabadka baaritaanka	bogga 17
9	Si badbaado leh u tuur baaridaada	bogga 17

Ku dhawaad 1 qof 3dii qof ee qaba COVID-19 ma oga inay qabaan.

Talooyin ku saabsan qaadashada baaritaanka

Hagitaanka Keydinta iyo Qabashada

- Ku kaydi sidii baakad ahaan heerkulka qolka (2-30°C). Ha qaboojinin.
- Xirmada waa in lagu isticmaalo heerkulka qolka (15 °C ilaa 30 °C). Haddii xirmada lagu kaydiyay meel qabow (in ka yar 15°C), ku dhaaf heerkulka qolka caadiga ah 20 daqiiqo ka hor inta aanad isticmaalin.
- U isticmaal qalab gaar ah oo baaritaan qof kasta. Waxaad isticmaali kartaa shay kasta oo ku jira xirmada baaritaanka hal mar. Dib ha u isticmaalin alaabta. Waxaad u baahan doontaa inaad soo sheegto natiijada qof kasta.
- Haddii ay dhibaato kaa haysato gacmahaaga ama araggaaga, waxa laga yaabaa in aad u baahato cid kaa caawisa geeddi-socodka suufka iyo baaritaanka.
- Haddi aad qabto birta duleelisa sanko, ka saar birta duleelinta ka hor inta aanad samaynin baaritaanka.
- Ka fogow isticmaalka muunado dhiig leh. Haddii aad qabtay san qoroor 24-kii saac ee la soo dhaafay waa in aad sugtaa 24 saac ka hor inta aadan baaritaan sameyn.
- Ha taaban madaxa suufka markaad qabanayso suufka.
- Iska ilaali inaad taabato xirmada baaritaanka iyo aagga natiijada ee daaqadda meesha muunada lagu daray.

Digniino

- Ha isticmaalin taariikhda dhicitaanka ka dib. Fadlan raac taariikhda dhicitaanka ee ku qoran sanduuqa.
- Cajaladu waa in ay ku jirtaa jeebka sharooteesan ilaa inta uu diyaar u yahay in la isticmaalo.
- Xirmooyinkan baaritaanka waxaa loogu talagalay oo kaliya isticmaalka aadanaha.
- Ha isticmaalin wax buufin sanko ah 15 daqiiqo kahor baaritaanka.
- Alaabta laguma samayn cinjirka caagga ee dabiiciga ah si kastaba ha ahaatee joogitaanka ama raadadka cinjirka dabiiciga ah ee alaabta sida loo geeyey isticmaalaha ugu dambeeya lagama saari karo gabi ahaanba.

Si taxaddar leh u raac tilmaamahan, baaritaankani wuxuu ka duwanaan karaa kuwii aad hore u isticmaashay.

Koodhka alaabta: COVID19AGVCGS7

Ku saabsan

Maxaad isku baaraysaa

Xirmadan COVID-19 ee is-baarida ayaa ah baaritaanka sanka ee suufka ah. Waxaa loo isticmaali karaa dadka aan lahayn wax calaamado ah, si kastaba ha ahaatee waa inaad raacdaa tilmaamaha qaranka si aad u hubiso nooca baaritaanka kugu habboon.

Haddii aad iska baarto COVID-19 waa inaad:

- Caawi xaddida faafitaanka cudurka, adiga iyo qoyskaagu waa inaad raacdaan tilmaamaha dawladda ee hadda: nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/self-isolation-and-treatment/
- La tali dadka aad xiriir dhow la lahayd iyo meelaha aad booqatay 48-kii saac ee la soo dhaafay ka hor inta aysan calaamaduhu bilaabanin, ama laga bilaabo maalinta baaritaanka baarista togan la arko haddii aysan jirin astaamo, si aad u baarto suurtagalnimada caabuqa COVID-19. Had iyo jeer raac tilmaamaha deegaanka iyo qaranka.

Haddii lagaa waayo COVID-19

Waxay u badan tahay inaad kugu dhicin wakhtiga baaritaanka la qaaday. Natiijada baaritaanka taban, si kastaba ha ahaatee, ma damaanad qaadayso inaad qabin coronavirus. Waa inaad sii waddaa raacitaanka tilmaamaha dawladda.

TALO

Ha ka daahin helitaanka caawimada haddii aad welwelsan tahay. Ku kalsoonow dareenkaaga.

Haddii aad leedahay calaamadaha COVID-19 ama aad qabtid COVID-19, fadlan raac hagida NHS: nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/


Haddii aad leedahay calaamadaha COVID-19 oo xaaladdaadu ka sii darayso, ama aadan ka soo roonayn toddoba maalmo ka dib, isticmaal adeegga coronavirus ee khadka tooska ah ee NHS 111 111.nhs.uk

Haddii aadan haysan isticmaalka khadka tooska ah, wac **NHS 111**.

Haddii aadan lahayn internet, wac wxii xaalad degdeg ah oo caafimaad wac **999**.


Waxaad ka heli kartaa talo badan oo ku saabsan calaamadaha COVID-19 ee carruurta: nhs.uk/conditions/coronavirus-COVID-19/symptoms/coronavirus-in-children/

Yaa ku habboon baaritaankan



Dadka Waaweyn da'dooda tahay 18+

Is baar oo soo sheeg iyadoo la kaashanayo haddii loo baahdo.



Qaangaarada da'dooda tahay 12-17

Is baar oo soo sheeg adigoo ku wehliya kormeere qof weyn. Qofka weyn ayaa laga yaabaa inuu sameeyo baaritaanka sida la muhraanka ah.



Carruurta ka yar 12

Qofka weyn waa inuu baaraa carruurta da'doodu ka yar tahay 12 sano. Ha samayn baaritaankan haddii aad ku qanacsanayn inaad ilmaha baarto. Ha sii wadin baaritaanka haddii ilmuhu dareemo raaxo-darro ama xanuun weyn.

Sida hadda iyo jeer la-isku baaro

Inta jeer ee ay tahay inaad isbaarto way kala duwanaan kartaa iyadoo ku xiran duruufahaaga iyo xeerarka heer qaran ama deegaan ee hadda jira.

Halka laga heli karaa taageero dheeraad ah

Ka hel macluumaad badan oo is-baaritaanka ah: [gov.uk/covid19-self-test-help](https://www.gov.uk/covid19-self-test-help)

Buug-yarahaan tilmaamuhu waxa uu kaliya tixraacayaa SARS-CoV-2 Baaritaanka Difaacaha Jirka Deg Degga ah Cassette (Suufka sanko) (Dehab), Koodka alaabta: COVID19AGVCGS7.

Koodhka alaabta: COVID19AGVCGS7

1. Diyaarso aaggaaga baaritaanka

MUHIIMADA

Xirmada waa in lagu isticmaalaa heerkulka qolka (15 °C ilaa 30 °C). Haddii xirmada lagu kaydiyay meel qabow ah (in ka yar 15°C), ku dhaaf heerkulka qolka caadiga ah 20 daqiiqo ka hor inta aadan isticmaalin.




Ha isticmaalin wax buufin sanko ah 15 daqiiqo kahor baaritaanka



15
daqiiqo

Waxaad u baahan doontaa: saacad (sida saacad gacanta ama saacad istaaga), unugyo, gacmo nadiifiye ama saabuun iyo biyo diirran.



1

Si taxadar leh u akhri hagaha tilmaamaha.



2

Cadey, nadiifi oo engeji meel siman isla markiiba ka hor inta aanad bilaabin baaritaanka.




3

Si fiican u dhaq gacmahaaga 20 ilbiriqsi, adoo isticmaalaya saabuun iyo biyo diirran, ama gacmo nadiifiyaha.




Hubi waxa ku jira xirmadaada

- 4 Gudaha Sanduuqaaga baaritaanka waa inaad ku haysataa:



Sanduuqa dibadda oo leh tuubo-haaye




Ku baar cajaladaha boorsooyin xiran



Baakadaha dareeraha ah (Fijaannada kaydinta soo saarista)



Tubooyinka soo saarista



Tilmaamaha loogu talagalay isticmaalka (buug-yarahan)



Bacaha qashinka caagga ah



Suufaf

TALO


Maxaa la sameeyaa haddii ay wax dhaawacmaan, jabaan ama maqan yihiin

Haddii aad aragto wax burburay, jabay ama maqan, fadlan ha isticmaalin qalabka baaritaanka. Waxaad ku siin kartaa jawaab celin adigoo wacaya xarunta xiriirka macaamiisha. Khadadka wuxuu furan yahay maalin kasta, 7 subaxnimo ilaa 11 galabnimo.

Wac: **119** (oo ka madax banaan mobeelada iyo taleefoonada dhulka). Waxaan ku bixinaa taageero 200 oo luqadood ah iyo sidoo kale Luqadda Calaadaha Ingiriiska.

Haddii qalab kugu waxyeeloobo, u gudbi: [coronavirus-yellowcard.mhra.gov.uk](https://www.coronavirus-yellowcard.mhra.gov.uk)

2. Diyaarso baaritaankaaga




5

Ka soo saar cajaladda baaritaanka ah shandada xiran oo dhig meel siman oo nadiif ah.

DIGNIIN



Marka la furo, ku isticmaal 1 saac gudahood, haddii kale baaritaanku wuxuu noqonayaa mid maran aan waxba ka jirin. Tuur cajaladda iyo waxa ku jira kiishka oo dibadda ka ahaa kiishka xiran in ka badan 1 saac.



6

Geli tuubada soo saarista tuuba haayaha (meel wareeg ah oo dalool leh daboolka sanduuqa) si liskaga ilaaliyo daadinta dareeraha.



Ka taxadar

7

Si taxadar leh u leexi si aad u dhufato fur kiishka dareeraha ah. Ka fur adigoo ka taxdaraya wejigaaga oo ka taxadar inaad daadin mid ka mid ah dareeraha.

DIGNIIN

Qalabka wax-soo-saarku waxa uu ka kooban yahay walxo aburi kara cuncun haddii ay taabtaan wejiga ama maqaarka. Haddii walaxa qasan uu taabto maqaarka ama isha, ku dhaq biyo badan. Haddii maqaarka uu ku dhaco cuncuno fadlan raadso daryeel caafimaad.



Ka taxadar

8

Fur tuubada soo saarista oo si tartiib ah ugu tuuj dhammaan dareeraha ku jira boorsada gudaha tuubada.

Ka taxadar oo ku rid bacaha dareeraha ah ee maran bacda qashinka ee lagu siiyay.



9

Si tartiib ah sankaa u mari maro ka dibna ku tuur marada weelka xiran.


Haddii aad qof kale caawinayso ama aad baarayso ilmo, ku caawi inay sankaa ka qabtaan oo ay ku tuuraan marada weelka gashin xiran.



10

Gacmahaaga si fiican u dhaq mar labaad 20 ilbiriqsi addoo isticmaalaya saabuun iyo biyo diiran ama isticmaal nadiifiye.

Haddii aad qof kale caawinayso ama aad baarayso ilmo, ku caawi inay dhaqdo gacmahooa.




11

Ka hel suufka ku duub duuban ee hortaada yaal. Aqoonso caarada jilicsan ee dharka.

MUHIIMADA

Ha taaban cidhifka jilicsan ee marada ee suufka. Haddii caarada marada ee suufka la taabtay, iska tuur suufka.



12


Si tartiib ah u diir fur baakadaha suufka ee cidhifka kale, kaliya markaad diyaar u ah isticmaalka.

3. Qaado muunada suufka

Haddii aad qof kale baarayso, fadlan tixraac tilmaamaha bogga 11.


MUHIIMADA

Baaritaanka waa in lagu sameeyaa muunada sanko oo kaliya.



13


Geli caarada dharka ee suufka gudaha ha dalool oo sanko ah (qiyaastii 1.5cm kor sankaga).



14

Si tartiib ah u tirtir suufka ku wareegsan gudaha sankaga si wareeg ah **5 jeer** ugu yaraan **5 ilbiriqsi**.

Si tartiib ah uga saar. Xoog uma baahnid mana aha inaad meel fog ka riixdo sankaga. Ha ku soo celin suufka warqadii asalka ahayd.



15

Adigoo isticmaalaya suuf isku mid ah, dhig caarada suufka ee gudaha kan kale san qoroorka (kaasoo ah ku dhawaad 1.5cm xagga sankaga.)


Si tartiib ah u tirtir suufka ku wareegsan gudaha sankaga si wareeg ah **5 jeer** ugu yaraan **5 ilbiriqsi**.



Ku samaynta baaritaan qof kale


TALO

Carruurta ka yar 12 sano waa in uu baaraaqof weyn. Raac tilmaamaha hoose ee ku saabsan sida loo diyaariyo oo loo baaro ilmaha. Waxaad ka daawan kartaa muuqaal bandhiga ah [gov.uk/covid19-self-test-help](https://www.gov.uk/covid19-self-test-help)




13

Haddii aad ilmo baarayso, tus qalabka baaritaanka oo ka hadal waxaad tahay u socdo inaan sameeyo. Haddii ay suurtagal tahay, ku fariiso qof dhabtiisa ama qof ha qabto gacanta.



14

Geli caarada dharka ee suufka gudaha sanqororkooda (ilaa 1.5cm), ama ilaa aad dareento iska caabin. Si tartiib ah u tirtir suufka ku wareegsan gudaha sankooda si wareeg ah **5 jeer** ugu yaraan **5 ilbiriqsi**. Si tartiib ah uga saar. Xoog looma baahna mana aha inaad meel fog ka riixdo sankooda. Ha ku soo celin suufka warqadii asalka ahayd.



15


Adigoo isticmaalaya suuf isku mid ah, dhig cidhifka marada ee suufka gudaha sankooda kale (illaa 1.5cm) ama ilaa aad dareento iska caabin.

Si tartiib ah u tirtir suufka ku wareegsan gudaha sankooda si wareeg ah **5 jeer** ugu yaraan **5 ilbiriqsi**.

4. Samee muunada suufka

TALO

Si loo helo waxqabadka ugu fiican, ku baar suufka sida ugu dhakhsaha badan ka dib markaad soo ururiso muunadaada.



16

Soo qaado tuubada soo saarista oo dhig caarada dharka suufka ee tuubada soo saarista, waa sidaas dareeraha ku jira.

Ku cadaadi madaxa suufka si adag uga soo horjeeda gudaha tuubada adigoo ku dhejinaya suulka iyo farahaaga hoose ee tuubada.


Inta aad qaloocinayso, ku wareeji suufka ugu yaraan 10 ilbiriqsi.



17


Xoogaa kor u qaad suufka sanku ka dibna jebi suufka meesha "Xaddiga kala go'a". Ka tag madaxa suufka ee tuubada soo saarista.

Ku rid gacanta suufka bacda qashinka ee lagu siiyey.



18


Si adag ugu dheji daboolka dhobicda dusha sare ee tuubada soo saarista.



19

Hubi in cajalada baaritaanka ahi ay saaran tahay meel nadiif ah oo siman.

Ha dhaqaaqin cajaladda inta lagu jiro baaritaanka.




20

Si tartiib ah u tuuji tuubada soo saarista si aad 3 dhibcood oo dareere ah u shubto weelka muunada (S) oo ku yaal marinka baaritaanka.

Hubi inaad dhibjinayso dareere oo aysan ahayn xumbo hawo.

Tuubada soo saarista ku rid bacda qashinka.



21

Bilow saacad-sameeyaha oo sug 10 daqiiqo ka hor inta aanad akhriyin natijada.

Ha dhaqaaqin baaritaanka mar uu socdo. Fasiro natijada 10 daqiiqo ka dib. Ha akhryn 20 daqiiqo ka dib.

Waa in aad sugtaa 10 daqiiqo ee wakhtiga horumarka ka hor inta aanad akhriyin natijada baaritaankaaga.



5. Akhri natiijadaada

MUHIIMADA



Sug 10 daqiiqo si aad u akhriso natiijada.



Ha uga tagin baaritaanka si uu soo saaro wax ka badan **20 daqiiqo**. Tani waxay ka dhigi doontaa baaritaan maran aan waxba ka jirin.



Natiijada Togan


Laba xariiq ayaa soo muuqanaysa. Hal xariiq oo midab leh waa inuu ahaadaa ee goobta xariiqda kantaroolka (C), iyo xariiq kale oo midab leh waa in uu ku yaalaa goobta xariiqda tijaabada (T).

Laba sadar, mid ku xiga C iyo mid ku xiga T, xitaa xariiqyo daciif ah, ayaa muujinaya in baaritaanku togan yahay oo lagaa helay.

MUHIIMADA


Haddii lagaa helo cudurka, waa inaad is-gooni yeeshaa, qoyskaagu waa anay raacaan tilmaamaha dawladda ee ku saabsan iskarantiilida:

[nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/self-isolation-and-treatment/](https://www.nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/self-isolation-and-treatment/)



Natiijada taban

Hal xariiq oo midab leh ayaa ka muuqda goobta xariiqda kantaroolka (C). Wax xariiq ah kama soo muuqanaysa goobta xariiqda baaritaanka (T).




Natiijo maran aan waxba ka jirin

Xariiqda Xakamaynta (C) way soo bixi waynaysaa.

6. Ka warbixi natiijadaada

Waa in aad NHS u soo sheegtaa natiijadaada togan, taban ama maran



Diwaangelinta dhammaan natiijooyinka baaritaanka waxay ka caawisaa saynisyahannada inay ogaadaan faafitaanka fayraska cusub oo ay kula taliyaan sida looga jawaabo.

Haddii dadku kaliya soo sheegaan natiijo togan, heerarka kiisku waxay u muuqdaan kuwo ka sarreeya sida dhabta ah. Markaa xitaa haddii natiijadaadu tahay mid taban ama maran, waxaad hubin doontaa in macluumaadka NHS uu ahaado mid sax ah. Waxaad u baahan tahay koodhka QR, ama lambarka aqoonsiga ee hoostiisa si aad natiijadaada uga warbixiso.



Ugu warbixi khadka (ugu dhaqsiyaha badan). Haddii aad ku nooshahay England, Wales ama Waqooyiga Ireland booqo [gov.uk/report-covid19-result](https://www.gov.uk/report-covid19-result)

Haddii aad ku nooshahay Scotland booqo [covidtest.scot](https://www.covidtest.scot)



Ama telefoon ahaan ku warbixi.

Haddii aadan ku soo sheegi karin natiijadaada onlayn, wac **119** (oo ka madax banaan moobeelada iyo telefoonada dhulka).

Khadadka ayaa furan maalin kasta. 7 subaxnimo ilaa 11 galabnimo.

Koodhka alaabta: COVID19AGVCGS7

7. Maxay natiijadaadu ka dhigan tahay

Kaliya waxaad dhammaysay baaritaankaaga markii aad gudbisay natiijadaada

+ Natiijo Togan

Haddii aad hesho natiijo togan, waxay u badan tahay inaad hadda qaaday COVID-19 oo aad halis u tahay inaad dadka kale qaadsiiiso. Waa inaad is-gooniyeeshaa. Markaad ka warbixiso natiijadaada, waxaa lagu siin doonaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tillaabooyinka xiga ee aad qaadi doonto.

DIGNIIN

Adiga, iyo qof kasta oo kula nool, waa in aad raacdaa hagidda heer qaran iyo mid deegaanba. Tan waxaa laga heli karaa: nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/self-isolation-and-treatment/

- Natiijo Taban

Haddii aad hesho natiijo taban, waxay u badan tahay inaad qaadin wakhtiga aad baaritaanka gashay. Natiijada baaritaanka taban, si kastaba ha ahaatee, **ma damaanad qaadayso inaad qabin COVID-19.**

Haddii lagaa waayo cudurka, waa inaad sii waddaa raacitaanka xeerarka iyo xeerarka qaranka iyo deegaanka, oo ay ku jiraan gacmo-dhaqashada joogtada ah, fageynta bulshada iyo xidhashada daboolka wejiga, halka looga baahdo.

Haddii aad isku aragto calaamadaha waa in aad gooni isu taagto oo aad ka heshaa baaritaanka hadda lagu taliyay: gov.uk/get-coronavirus-test ama adigoo wacaya xarunta xiriirka macaamiisha 119. Khadadka waxay furan yihiin maalin kasta, 7 subaxnimo ilaa 11 galabnimo.

Adiga iyo qoyskaagu waa inaad raacdaan tilmaamaha qaranka.



Natiijo maran

Haddii aad hesho natiijo maran aan waxba ka jirin, tani waxay la macno tahay in baaritaanku aanu si sax ah u socon oo aanay suurto ahayn in la sheego haddii aad qabtay fayraska markii baaritaanka la sameeyay. Waxaad u baahan tahay inaad isticmaashid baaritaan kale oo baakadda sida ugu dhakhsaha badan. Wax dib ha ugu isticmaalin baaritaankii ugu horreeyay, oo ka bilow habka tijaabada tallaabada 1.

Haddii dhibaataadu sii socoto, jooji isticmaalka qalabka baaritaanka isla markaaba. Dalbo xirmo cusub oo xirmooyinka baaritaanka ah adiga oo booqanaya: gov.uk/get-coronavirus-test, iyada oo loo marayo NHS COVID-19 App ama adoo wacaya xarunta xiriirka macaamiisha **119**. Khadadka waxay furan yihiin maalin kasta, 7 subaxnimo ilaa 11 galabnimo.

8. Waxqabadka Baaritaanka

Baaritaanka waxay aad ugu dhowdahay inay keento natiijo togan haddii qof uu leeyahay heerar sare oo ah coronavirus (COVID-19). Tani waxay ka dhigan tahay in ay aad ugu dhowdahay in la ogaado dadka hadda cudurka qaba oo u baahan in ay isla markiiba is karantiilaan.



9. Si badbaado leh u tuur baaritaankaaga

Marka baaritaankaagu dhammaato, ku rid dhammaan wixii la isticmaalay bacda qashinka ah oo tan ku rid qashinka guud ee gurigaaga.

Si fiican u dhaq gacmahaaga ka dib marka aad tuurto.

Macluumaadka buug-yarahaan waa sax laga bilaabo (29 Sebtembar 2021).

Koodhka alaabta: COVID19AGVCGS7

Magaca Alaabta: SureScreen SARS-CoV-2 Cajalada Baaritaanka Degd egga ah ee Difaaca Jirka (Suufka sanko) (Dahab)

Qoraal ka samee natiijooyinkaaga baaritaanka

Tani waxa loogu talagalay diiwaannadaada.
Waa inaad weli natiijadaada u soo sheegtaa NHS
(ka eeg macluumaadka bogga 15).
Booqo: gov.uk/report-covid19-result

Haddii aad ku nooshahay Scotland booqo covidtest.scot

Yaa qaatay baaritaanka	Taariikhda	Waqtiga	Natiijada Baaritaanka

Qalabkaagu wuxuu ka kooban yahay agabyada soo socda

alaabaha	7-baako
Tilmaamaha isticmaalka (Buug-yarahan)	1
Ku baar cajaladaha boorsooyin xiran	7
Baakadaha dareeraha ah (Fijaannada kaydinta soo saarista)	7
Tuubooyinka soo saarista	7
Suufaf	7
Bacaha qashinka caagga ah	7

Koobnaan Macluumaad Dheeraad ah

<p>Taageero Isbaaritaano dheeri ah Noocyada luqadda beddelka ah iyo bandhigyo muuqaal ah Tilmaamaha diyaarinta iyo baarida ilmaha</p>	<p>gov.uk/covid19-self-test-help</p>
<p>Tilmaanta is-gooneyeenta iyo macluumaadka daaweynta</p>	<p>nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/ self-isolation-and-treatment/</p>
<p>Hagidda NHS ee COVID-19</p>	<p>nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19</p>
<p>Haddii aad leedahay calaamadaha COVID-19 oo xaaladaadu ka sii darto, ama aadan ka soo rayn todoba maalmood ka dib, isticmaal adeega coronavirus online NHS 111:</p>	<p>111.nhs.uk Ama wac NHS 111 haddii aadan internet haysan</p>
<p>Calaamadaha COVID-19 ee carruurta</p>	<p>nhs.uk/conditions/coronavirus-COVID-19/ symptoms/coronavirus-in-children</p>
<p>Haddii qalab kugu waxyeeloobo, u sheeg</p>	<p>coronavirus-yellowcard.mhra.gov.uk</p>
<p>Ka warbixi natiijada internetka (England, Wales ama Waqooyiga Ireland)</p>	<p>gov.uk/report-covid19-result</p>
<p>Ku soo sheeg natiijada si onlayn ah (Scotland)</p>	<p>covidtest.scot</p>
<p>Dalbo baaritaanka hadda la farmay</p>	<p>gov.uk/get-coronavirus-test</p>
<p>Wax dhaawacmay, jabay ama ka maqan Taageerada luqadda (ay ku jirto Luqadda Dhagoolada Ingiriiska) Ka warbixi natiijadaada (haddii aanad internet lahayn)</p>	<p>Wac 119</p>

Qoraalo:

Buug-yarahaan tilmaanta kaliya waxa uu tixraacayaa SureScreen SARS-CoV-2 Cajalada Baaritaanka Deg degga ah ee Difaaca Jirka (Suufka sanka) (Dahab)

Keenitaanka qalabkan waxa kaliya oo loo ogolyahay qayb ka mid ah geynta Waaxda caafimaadka iyo daryeelka bulshada (DHSC) ee hoos timaada barnaamijka Baaritaanka iyo Raad-raaca NHS.



Soo saaraha:

SureScreen Diagnostics

1 Prime Parkway, Prime Enterprise Park, Derby, DE1 3QB, United Kingdom (Boqortooyada Ingiriiska).



Macluumaadka Suufka

Zhejiang Gongdong Medical Technology Co., Ltd.
Cinwaan: No.10 Beiyuan Ave., Huangyan, 318020
Taizhou, Zhejiang, People's Republic of China
(Jamhuuriyadda Dadka ee Shiinaha)



Jiangsu ChangFeng Medical Industry Co., LTD
Cinwaan: Touqiao Town, Guangling District,
Yangzhou, 225109 Jiangsu P.R. China
(Jamhuuriyadda Dadka ee Shiinaha)



Calaamado



Ku keedi heerkul 2 – 30°C



Lagu jeermis dilay ayadoo la isticmalaayo ethylene oxide



Soo saaraha

Ha isticmaalin badeecada haddii baakada la dhaawacay



Lambarka lootka



Taariikhda dhicitaanka



Qalab caafimaad oo lagu baaro faytrooga

Kala tasho "Talada ku saabsan baaritaanka" qaybta haggida guud iyo digniinta



La tasho tilmaamaha isticmaalka



Waxaa ku jira wax ku filan 7 baaritaan



Dib ha u isticmaalin



Lambarka buuga

Nooca 5 Taariikhda dhaqan galaysa 29/09/2021

Tilmaamaha isticmaalka, waxay la xiriiraan SARS-CoV-2 Cajalada Baaritaanka Deg Degga ah (Suufka sanka) (Dahab), soo saaraha: SureScreen Diagnostics iyo koodka alaabta: COVID19AGVCGS7